# Munaasibaddii 26 June iyo Daahfurka buugga NABADSHE

**Cabdi C/laahi Xasan**



(London 30 June 2005)Xaflad ballaadhan oo lagu xusaayo sannadguuradii 45 ee munaasabadda 26 Juun, sidoo kalena lagu daahfuray buugga cusub ee la magac baxay NABADSHE ee uu soo bandhigay qoraaga da'da yar ee Yaasiin Jaamac Nuux (Suldaan) ayaa ka dhacday guriga dhaqanka ee Oxford House, magaalada London ee carriga Ingiriiska.

Munaasabadan oo si fiican loo agaasimay waxa ka soo qayb galay dad badan oo isugu jira qaybaha bulshada oo ay ka mid yihiin fanniin, abwaanno, aqoonyahanno iwm.

Ugu horrayn; waxa lagu furay munaasabadda aayado Qur'aan ah. Munaasabadan uu qaybteeda hore uu daadahaynaayey Faysal Cilmi wuxuu si kooban u la durmay taariikh nololeedka qoraaga oo ku tilmaamay inuu yahay wiil dhallinyaro ah oo da'yar oo soo barbaaray xilligii ay socdeen dagaallada Soomaalidu; ogna colaadda iyo nabaddu waxay yihiin. Wuxuu kale Faysal sheegay in Yaasiin Jaamac (Suldaan) uu muddadii yarayd ee uu Yurub joogay dadaal badan sameeyey oo uu sameeyey websiteka lagu kaydiyo suugaanta iyo dhaqanka Soomaalida ee Aftahan.com, haddana uu soo bandhigay buuggan cusub ee suugaantu ku qoran tahay ee nabadaynta ku saabsan. Waxaanu sheegay in dadaalka Suldaan yahay mid ku dayasho leh.

Intaas ka dibna waxaa la guda galay barnaamijkii waxaana goobtaas dad fara badan oo ka hadlay qiimaha ay leedahaday 26 June iyo buugga Nabadshe.

Waxaa kaloo halkaas lagu soo bandhigay suugaan fara badan oo aad loo xiiseeyey.

ugu horrayna waxaa halkaas ka hadlay Maxamed Daahir Afrah oo ah guddoomiyaha ururka qoraaga Soomaaliyeed waxaanu ka hadlay muhiimada ay leedahay munaasabadda 26 Juun, taasoo uu sheegay inay tahay maalin leh farxad iyo murugaba, taas oo ah maalintii la taagay calankii ugu horreeyey ee Soomaali, waxaanu dadka ku booriyey inaan maalintaas dhinaca xun laga eegine dhinaca wanaagsanna laga eego.

Mr. Afrah wuxuu kaloo ka hadlay buugga Nabadshe iyo waxyaabaha uu xanbaarsan yahay, waxaanu hadalo ammaan iyo dhiirigelinba u soo jeediyey qoraha buugga. Sidoo kalena wuxuu ka hadlay inuu abwaanka da'da yare ee buugga laga qoray ee Yuusuf Cismaan Cabdille uu shaqsiyan u yaqaan oo ay ku kulmeen Djbouti. Waxaanu sheegay inuu Yuusuf-Shaacir yahay abwaan da' yar laakiin Ilaahay hibo u siiyey waxyaabo fara badan oo ay ka mid yihiin: Isaga oo abwaan hal-abuura ah, islamarkaasna ku caan ah suugaanta aan la soo diyaarin ee goobta laga tirayo, loona yaqaano gole-ka-fuulka . Wuxuu kale oo Afrax sheegay in suugaantiisu ku caan-baxday nabadaynta iyo qaboojinta colaaddaha ka holcaday meelo ka mid ah Soomaaliya, taas oo uu sheegay inuu mutaystay billad geesinnimo. Intaas waxaa u dheer buu yidhi; in Yuusuf-Shaacir yahay nin xafida suugaanta Soomaalida, uuna yahay diiwaanka suugaanta maskaxda lagu kaydiyo, taas oo kaga duwan yahay abwaannada kale. Waxaanu tilmaamay inuu Yuusuf-Shaacir yahay waa cusub oo u baryey suugaanta Soomaalida.

Waxaa kale oo iyana goobtaas ka hadashay Foosiya X. Aadan oo faalo kooban ka bixisay muhiimada ay leedahay munaasabaddani, sidoo kalena sheegtay inay aad ugu faraxsanm tahay buuggan cusub ee ka sheekaynaya nabadda, waxay kaloo iyana si kooban uga hadashay muhiimada ay leedahay munaasabaddani, iyadoo ku tilmaantay maalintii Somaliland xorawdey.




Waxaa kale oo isn halkaas ka hadlay Yaasiin Jaamac Nuux (Suldaan) oo ah qoraha buugga Nabadshe, wuxuu u mahadnaqay dadkii ka soo qayb galay xafladda iyo kuwii caawiyey ama ku dhiirigeliyey muddadii uu qoraayey buugga, taasoo uu sheegay inuu isagoo sidiisaba aad u xiiseeya suugaanta

Soomaalida oo ah webmaster-ka ama agaasimaha website suugaanta Soomaalida lagu kaydiyo ee www.Aftahan.com. Waxaanu sheegay Yaasiin inuu sigaara u sii xiiseeyo suugaanta ka hadlaysa nabadaynta iyo heshiisiinta, oo ah mid ay maanta ummadda Soomaalidu baahi weyn u qabto. Waxaanu sheegay inuu sigaar ah u sii xiiseeyo suugaanta Yuusuf-Shaacir sababtoo ah waxaa Ilaahay hibo u siiyey hal-abuurnimada, aftahanimo, guurtinimo, iyo farshaxanimada. Waxaanu sheegay inuu Yuusuf Shaacir istaahilo bilad sharafta nabadgelyada ee loo yaqaan (nobel peace price).

Waxaa kale oo laga sheekeeyey taariikhda Somaliland iyo siday ku qaadatay xornimadeeda, iyo waayahii adkaa ee ay soo martay taariikhda Somaliland.

Waxa kale oo iyana madasha ka hadlay abwaano dhowr ah oo halkaas ka soo jeediyey suugaan kala duwan oo isugu jirta waddani, jacayl, hogatusaalayn iyo hawaallo-warran oo dadkii madasha joogay aad u xiiseeyeen waxaana madasha ka hadlay abwaanada ay ka mid ahaayeen: Ismaaciil Aw-aadan, Cali Axmed Raabi (Seenyo), Cumar C/nuur (Nabaddoon), C/laahi Bootaan (Kurwayne), Suldaan Ibraahim, Maxamed Dhagles oo isagu gebogebadii xafladda tiriyey gabay gole-ka-fuul ah oo uu ku tilmaamayo muhiimadda maalinta 26 Juun, kuna dhiiri gelinayo qoraha buugga Nabadshe ee Yaasiin-Suldaan.

Haddaba; marka laga yimaado dadka reer Somaliland ee halkaa iska soo buuxiyey waxa kale oo iyaguna xafladda ka qayb galay dad badan oo Soomaali ah oo ka soo kala jeedda gobollo kala duwan, waxayna u dhacday waji aad u fiican oo ay dheehnayd farxad iyo rayn rayni.



**A Bootaan**



**Nabadshe**



**ka qaybgalayaal**



**Yaasiin-Suldaan**



**ka qaybgalayaal**




**Yaasiin-Suldaan**



**Suldaan Ibraahim**



**ka qaybgalayaal**



**Cali-Seenyo**



**ka qaybgalayaal**



**ka qaybgalayaal**



**ka qaybgalayaal**

Maca salaama,
Cabdi C. Xasan | aftahanc@hotmail.com | London, UK

---

Faafin: **SomaliTalk.com** | July 5,2005 | Waxaa soo gaarsiiyey lehna xuquuqda bahda Aftahan.